
**Ku soo dhowoow** **Wareejinta Dheefaha Elektarooniga ah ee Washington (EBT) iyo Kaarka Washington ee Quest EBT —qaabka sahlan, ammaanka ah ee habboon ee loo isticmaalo dheefahaaga.**

Haddii aad xaq-u-leedahay dheefaha cuntada aasaasiga ah, waxaad u isticmaali kartaa Kaarkaaga Washington Quest EBT in aad ku iibsato agabka cuntada ah ee u-qalma dukaan kastoo ka qayb qaadanaya oo ay ku jiraan kuwo bixiya iibka internet-ka.

Haddii aad xaq-u-leedahay dheefaha kaashka, waxaad isticmaali kartaa Kaarkaaga Washington Quest EBT si aad u hesho kaash ama aad ugu bixiso waxyaabaha aad ka iibsato dukaamada ka qayb qaadanaya, iyo in aad kala soo baxdo dheefahaaga makiinadaha ATM-yada.

## Aad ayay u fududahay!




### SIDA LOOGU ADEEGSADO KAARKAAGA WASHINGTON QUEST EBT DUKAANKA

1. Oggoow lacagtaada baaqiga ah ka hor inta aadan aadin dukaamaysiga adiga oo booqanaya www.ebtedge.com ama wac Adeegga Macmiilka.
2. Mari Kaarkaaga Washington Quest EBT Barta-Iibka (POS) AMA kaarkaaga u dhiib karraaniga/khasnajiga.
3. Hubso in aad u sheegto karraaniga koontada xisaabta lagu dalacayo lacagta (cuntada ama lacagta caddaanka ah).
4. Geli Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiyeed ee afarta-lambar ka kooban (PIN) looxada wax lagu qoro. Meesha ay wax ku soo qormaan waxaa ku soo muuqanaya ****.
5. Riix furaha OK(HAGAAG) ama ENTER(GELI).
6. Karraaniga wuxuu gelinayaa caddadka iibsiga kadibna, haddii ay sax tahay, waxaad riixeysaa furaha YES(HAA).
7. Karraaniga wuxuu gacanta kaa saarayaa rasiidkaaga. Hubso macluumaadka rasiidka ku qoran in uu yahay mid sax ah.
8. Hayso rasiidkan sidaa daraaddeed waxaad marka xigta ee aad dukaamaysanayso ku oggaanaysaa baaqigaaga cusub.

Tallaabooyinku waxay noqon karaan kuwo u kala duwan nooc kasta ee makiinadaha Barta-Iibka ah (POS) am nidaamka ka bixidda ee aad isticmaasho. Karraaniga weyddii haddii aad caawimo u baahan tahay.

Kaliya qaddarka saxda ah ee cuntada aad iibsatay ayaa laga jarayaa dheefta koontadaada dheefta cuntada. Dukaamadu kuma siinayaan bedel lagu bedelo iibsisiga dheefta cuntada.

Waxaad isticmaali kartaa dheefahaaga lacagta caddaanka ah si aad u samaysid la bixid kaliya-lacag caddaan ah ama si aad u iibsatid labadaba cunto iyo waxyaabo aanan cunto ahayn (saabuun, xafaayado, iwm.). Dukaamadu sidoo kale waxaa ay kuu soo celin karaan lacag kaash ah marka aad wax ka iibsato koontadaada xisaabta caddaanka ah. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, weyddii karraaniga.



### SIDA LOOGU ADEEGSADO KAARKAAGA WASHINGTON QUEST EBT MAKIINADA LACAGTA LAGALA BAXO (ATM)

(Loogu talogalay in lagala baxo dheefo kaash ah oo KALIYA; dheefaha cuntada lama heli karo iyadoo loo marayo ATM)

1. Geli ama dul mari kaarkaaga.
2. Geli Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiyeed (PIN) ka-dibna riix furaha OK(HAGAAG) ama ENTER(GELI).
3. Dooro furaha lagu calaamadeeyay WITHDRAW CASH(LA BAX KAASH) ka-dibna dooro CHECKING(BAARAYA).
4. Geli qaddarka lacagta ah ee aad jeceshahay ee ah tiro guud oo lacag ah, tusaale ahaan, 20 dolar, 40 dolar, 60 dolar, iwm.
5. Haddii uu jiro dulsaar dheeri ah:
   - Dooro YES(HAA) si aad u aqbasho ka-diba sii-wad macaamulaadka.
   - Dooro NO(MAYA) si aad u baajiso macaamulaadka haddii aadan doonaynin in aad bixiso lacagta dulsaarka ah.
6. Qaado kaarkaaga, rasiidkaaga iyo lacagtaada kaashka ah. Haddii uu kaarkaaga ka soo bixi waayo makiinada ATM, kala xiriir Adeega Macmiilka lambarkan 888-328-9271.
7. Tiri lacagtaada caddaanka ah kadibna isbarbardhig lacagta iyo tirada ku qoran rasiidka.
8. Rasiidka ATM waxaa uu ku tusin doonaa lacagta baaqiga ah ee weli ku harsan.

Waxaa dhici karta in ay kugu qaadato dhowr macaamulaad si aad ugala soo baxdo dhammaan dheefahaaga kaashka makiinada ATM haddii ay makiinadu ay xaddidayso lacagta aad kala bixi kartid halkii mar. Waxaa jiri karta lacag ay kugu soo dalacdo makiinadda ATM oo loogu talagalay macaamulaad kasta.

### SU'AALAHA IYO JAWAABAHA WASHINGTON QUEST EBT

#### *Sideen ugu heli karaa dheefahayga Kaarka Washington Quest EBT?*

Bil kasta dheefahaaga waxaa si otaamaatik ah loogu darayaa koontadaada xisaabta. Waxaad isticmaali doontaa isla kaarka Washington Quest EBT bil kasta si aad u hesho dheefahaaga. Inta aad isticmaalayso dheefahaaga si aad u hesho lacag caddaan ah ama ugu iibsato adeeg, baaqiga koontadaada xisaabta wuu isdhimayaa. Looma baahna in aad bedesho kaarkaaga haddii uu kaa lumo, lagaa xado, ama uu xumaado mooyaane.

#### *Goormee ayaan helayaa dheefahayga?*

Dheefaha waxaa lagu shubayaa koontadaada xisaabta EBT isla maalintaasi ee bil kasta, xitaa haddii ay ku soo toosto dhammaadka todobaadka ama maalin fasax ah. Dhammaan dheefaha waxaa la heli karaa saacadu marka ay tahay 9 subaxnimo ee Wakhtiga Baasifiga. Dheefo kastoo kuugu harta dhammaadka bisha waxaa lagu darayaa oo loo wareejinayaa bisha xigta.

#### *Halkee ayaan ku isticmaali karaa Kaarkayga Washington Quest EBT?*

Waxaad ku isticmaali kartaa Kaarkaaga Washington Quest EBT dukaamada ka qayb qaadanaya iyo makiinadaha ATM (loogu talogalay kaliya dheefaha lacagta caddaanka ah) ee guud ahaan waddanka. Sidoo kale waxaad ku isticmaali kartaa kaarkaaga meel kasta oo aad ku aragto calaamada Quest. Haddii aadan arkin calaamada Quest, weyddii maamulaha dukaanka haddii aad ku isticmaali karto kaarkaaga dukaanka si aad ugaga iibsato cunto ama u heshid dheefo lacag caddaan ah.

#### *Maxaan sameeyaa haddii kaarkayga uu iga lumo?*

Haddii Kaarkaaga Washington Quest EBT Card uu kaa lumo, lagaa xado ama kaa xumaado, waa in aad si degdeg ah u wacdo telefoonka bilaashka ah ee Adeegga Macmiilka ee 888-328-9271 si hawsha looga jiijiyo, oo boostada laguugu soo diro kaar beddel ah.

#### *Muxuu yahay lambarka kaarkayga?*

Lambarka kaarkaagu waa 16-lambar ee ku daabacan kaarka korkiisa.

#### *Maxaan sameeyaa haddii kaarkayga uu ii shaqayn waayo?*

Wac Adeegga Macmiilka ka-dibna way ku caawin doonnaan. Lambarka bilaashka ah ayaa waxaa laga helayaa xagga dambe ee kaarkaaga. Adeegga Macamiilka waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood toddobaadkii.

#### *Maxaa dhacaya haddii ay jirto macaamilo aan sax ahayn oo lagu sameeyay koontadayda xisaabta ah?*

Marka tafaariiqle laga siiyo in badan ama in yar koontadaada xisaabta EBT iyadoo sabab u ah dhibaato nidaamka kombuyuutarka ah, sixitaan ayaa lagu samayn karaa baaqigaaga. Sixitaankan wuxuu saameyn doonaa baaqigaaga hadda ama midka bisha xigta ah. Waxaa boostada laguugu soo diri doonnaa oggaysiiska haggaajinta EBT ee sixitaanka haddii ay dhinto baaqigaaga.

#### *Sideen ku daryeeli karaa kaarkayga?*

1. Saxiix kaarkaaga gadaashiisa.
2. Haku dul qorin lambarkaaga PIN-ka kaarkaaga.
3. Kaarkaaga ka dhig mid ammaan iyo nadiif ah.
4. Ha isku laabin kaarkaaga.
5. Ka dheeray kaarkaaga bir-qabatada iyo qalabka elektarooniga ah, sida telefishannada, makiinadaha wax lagu kululeysto, iwm.
6. Ha dhigin kaarkaaga meel ay si toos ah ugugu dhacayso iftiinka qoraxda, sida shukaanta hore ee gaarigaaga.
7. Ha tuurin kaarkaaga; waxaad bil kasta isticmaali doontaa isla kaarkaasi inta aad qaadanayso dheefaha.
8. Beddelaadda kaarka ee xad-dhaafka ah waxaa laga yaabaa in lagu sameeyo baaritaan ah in khiyaanno loo isticmaalayo.

#### *Waa maxay Lambarka Aqoonsiga Shakhsiyeed?*

PIN waa afar lambar oo sir ah kuwaas oo u oggolaanaya adiga keliya in aad isticmaashid Kaarkaaga Washington Quest EBT. Kaarka EBT ma shaqeynayo PIN la'aan. Marnaba PIN-kaaga qof ha u sheegin! Haddii qof uu garanayo PIN-kaaga, waxaa ay kaarkaaga u isticmaali karaan in ay dheefahaaga oo DHAN helaan dheefahaasna laguuma soo celin doono.

#### *Sideen ku xushaa PIN?*

Waxaad xulan kartaa PIN-kaaga afarta-lambar ah adiga oo wacaya Adeegga Macmiilka ama qof ahaan u tagaya Xafiiska Adeegga Bulshada (CSO) ee DSHS ee degaankaaga. Ha adeegsan PIN fudud in la iska qiyaaso sida "1234, ama "0000", ama qaab fudud in la qiyaaso.

#### *Maxaan sameeyaa haddii aan iloowo PIN-kayga?*

Haddii aad iloowdid PIN-kaaga ama aad doonaysid in aad bedeshid PIN-kaaga, waxaad wici kartaa Adeegga Macamiilka.

#### *Maxaa dhacaya haddii aan geliyo lambar PIN khalad ah?*

Haddii aad gelisid PIN khaldan, waxaad haysataa seddex fursadood oo dheeri ah si aad u geliso lambarka saxda ah. Haddii PIN-ka saxda ah aan la gelin marka afaraad, kaarka waa la xiri doonaa si loo ilaaliyo xisaabtaada. Ma awoodi doontid in aad mar kale adeegsato kaarka ilaa saqda-dhexe ka-dib, haddii aad tagto mooyaane Xafiiska Adeegyada Bulshada ee DSHS ee degaanka si laguugu furo. Xaaladaha qaar, kaarkaaga waxaa kaa qaadan kara makiinada ATM. Haddii makiinada ATM ay kaa qaadato kaarkaaga, la xiriir Adeegga Macamiilka.

#### *Maxaan sameeyaa haddii uu qof kale oggaado PIN-kayga?*

Si degdeg ah u dooro PIN cusub adiga oo wacaya Adeegga Macamiilka, ama si toos ah uga beddelaya PIN-kaaga bartan internetka ah **www.ebtedge.com** ama app-ka telefoonka gacanta ee *ebtEDGE*.

#### *Sideen ku oggaan doonaa baaqiga ku jira koontadayda xisaabta?*

Qaabka ugu fudud ee lagu oggaan karo baaqiga ku harsan koontadaada xisaabtu waxay tahay in aad haysatid rasiidyadaada. Haddii aadan haysan rasiidyadaada, waxaad ka fiirin kartaa baaqigaaga boggan **www.ebtedge.com** ama app-ka telefoonka gacanta ee *ebt*EDGE ama waxaad wici kartaa Adeegga Macamiilka. Waa in aad marwalba ogtahay baaqiga koontadaada ka hor inta aadan dukaamaysan.

## Maxaa dhacaya haddii makiinada Barta libsiga (POS) aysan shaqaynin?

Haddii aad doonaysid in aad ku iibsato agab cunto u-qalma dheefahaaga cuntada oo makiinada Barta libsiguna aaney shaqaynin amaba uusan dukaanka lahayn, khasnajiga ayaa buuxin doona warqad lagu magacaabo warqada dheefta cuntada. Khasnajiga ayaa ku qori doona lambarka Kaarkaaga Washington Quest EBT iyo qadarka lacagta aad kharash gareynayso. HA SIININ khasnajiga PIN-kaaga. Khasnajiga ayaa wici doona si uu u oggaado haddii aad ku haysatid dheefo kugu filan koontadaada dheefta cuntada; ma eegi doonnaan koontada dheegtaada kaashka ah. Haddii ay ku jirto dheef cunto kugu filan koontadaada, waxaa lagu weyddiin doonaa in aad sixiixdid warqada ka-dibna waxaa lagu siin doonaa nuqulkeeda. Aad ayay muhiim u tahay in aad haysatid nuqulkan si aad uga goysid waxa aad kharash-gareysay baaqiga lagu muujiyay rasiidkaaga ugu dambeeyay ee EBT. Tani waxay ku siinaysaa qaddarka hadda ku jira koontadaada. Dukaanku ma soosaari karo warqad gacanta lagu qoro oo loogu talogalay dheefaha lacagta caddaanka ah.

## Ma u tagi karaa shaqaalaha bangiga oo ma kala soo bixi karaa lacag ama wax ma ka weyddiin karaa koontadayda xisaabta EBT?

Maya, waxaad lacag kala soo bixi kartaa oo keliya makiinnad ATM ah ama iyadoo loo marayo makiinnadda POS oo bixisa kaash uu kuu soo celinayo dukaanka ka qayb qaadanaya. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan xisaabahaaga dheefta cuntada ama kaashka, wac Adeegga Macmiilka.

## Haddii aan ku haysto dheefo kaash ah oo $10 dolar qiimo ahaan ka yar Kaarkayga Washington Quest EBT, sideen kula soo bixi karaa?

Waxaad ka samayn kartaa iibka makiinnada POS ama macaamulaad lacag-celin ah dukaamada ka qaybqaadanaya si aad u hesho lacagahaasi.

## Ma jiraan wax ujuurooyinka macaamil ama dulsaar ah oo loogu talogalay isticmaalka Kaarkayga Washington Quest EBT?

Marnaba ma jirto ujuuro macaamilo loogu talogalay isticmaalka dheefahaaga cuntada si aad cunto ugu iibsato kaarkaaga Washington Quest EBT. Sidoo kale marnaba ma jirto ujuurro macaamilo oo loogu talogalay isticmaalka dheefahaaga lacagta caddaanka ah si aad ugu iibsato cunto ama uga hesho lacag caddaan ah makiinnada POS.

Waxaa jiri kara lacago dulsaar ah. Lacagta dulsaarka ah waa lacag dheeri ah oo ay kugu soo dalacaan dadka iska leh makiinnada ATM ama Barta libsiga (POS) ee loogu talogalay isticmaalka makiinnadaasi si lacagta loogala soo baxo. Lacagaha dulsaarka ah, haddii ay jiraanba, waxaa sidoo kale si otomaatik ah loogala baxayaa koontadaada xisaabta kaashka. Haddii aadan doonaynin in aad bixisid lacagta dulsaarka ah, kaliya baaji macaamilkaaga ka-dibna aad makiinnad ATM kale ama meel kale oo Barta libsiga ah (POS) oo aan kugu soo dalacin lacag dulsaar ah.

## Ma jiraan xaddidaadyo ku saabsan sida aan u isticmaalo dheefaha lacagta caddaanka ee EBT-kayga?

Waxay ka soo horjeedaa sharciga in lagu isticmaalo kaarka EBT ama lacagta caddaanka ah ee kaarka EBT meelaha makhaayadaha, baararka, dukaamada khamriga, wakaaladaha dammaanada curaarta, goobaha madadaalada dadka waaweyn, iyo dhismo kastoo laga mamnuucay dhallinyarada, in lagu qamaaro, lagu sameysto calaamadaha ama sawirrada jirka lagu meegaaro ama jirka in lagu duro, ama in lagu soo iibsado tubaako/sigaar, xashiish, ama badeeco xashiish laga sameeyay.

## Maxaa dhacaya haddii aanan isticmaalin dheefahayga?

Dheefaha aan la isticmaalin inta lagu guda jiro bisha la soo saarey waxaa loo wareejinayaa bisha xigta. Haddii aadan ku isticmaalin ugu yaraan qaar ka mid ah dheefahaaga 274 maalmood gudahooda, dheefaha waa la baajin doonaa. Xaaladaha qaar, dheefahan laguuma beddeli doono.

## Lacag ma ku shuban karaa koontadayda EBT?

Maya. Waxaad kaliya kala soo bixi kartaa lacag koontadaada lacagta caddaanka ah.

## Maxaa laga wadaa Dhigaalka Tooska ah?

Halkii aad ka isticmaali lahayd EBT, waxaad dooran kartaa in dheefaha lacagtaada caddaanka ah si toos ah loogu shubo koontadaada shakhsiyeed ee bangiga. Uma isticmaali kartid dhigaalka tooska ah dheefaha cuntada. La xiriir DSHS si aad u hesho macluumaad dheeri ah ama wac lambarka bilaashka ah ee 888-235-2954.

## Maxaa laga wadaa Kaar-sidaha Bedelka ah?

Waxaad dooran kartaa qof, lagu magacaabo Kaar-side Bedel ah, si uu kuugu soo qaado dheefahaaga. Kaar-sidaha Bedelka ah waa in uu aado xafiis degaanka si uu u soo qaato Kaarka Washington Quest EBT Card iyo PIN-kiisa oo isaga u gaar ah. Haddii aad u baahan tahay Kaar-side Bedel ah, dooro qof aad ku kalsoontahay. Xasuusnoow, in aan laguu soo celin doonnin dheefaha la xadey ama lumey. Waad baajin kartaa kaarka Kaar-sidaha Bedelka ah adiga oo waca Adeegga Macamiilka.

## Goormee ayaan wacaa Adeegga Macamiilka?

- Haddii kaarka uu kaa lumo, lagaa xado ama ay waxyeello soo gaarto.
- Haddii aad iloowday ama uu kaa lumay PIN-kaaga.
- Si aad u xulato ama u beddesho PIN-kaaga.
- Si aad u oggaato baaqigaaga.
- Si aad u maqasho 10ka macaamilo ee kuugu dambeeyay.
- Si aad u codsato taariikhda labo-bilood oo macaamilo ah.
- Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan macaamilada.
- Haddii aad qabto su'aalo ama aad caawimo ugu baahan tahay kaarkaaga.

## Maxaa dhacaya haddii aan go'aansado in aan guuro ama bedelo cinwaankayga?

Si aad u soo sheegto isbeddel kasta, oo uu ka mid yahay cusboonaysiinta cinwaankaaga, la xiriir DSHS adiga oo wacaya 877-501-2233, ama isticmaal **www.washingtonconnection.org** si isbeddellada ugu soo sheegto barta internet-ka.

This pamphlet is available in your language at your local DSHS Office.

ይህ አነስተኛ መጽሔት በቋንቋዎ በአካባቢዎ የዲኤስኤችኤስ ጽህፈት ቤት ይገኛል። (Amharic)

إن هذه النسخة موفرة لك بلغتك في مكتب الـ DSHS في الضاحية التي تسكن بها. (Arabic)

កូនសៀវភៅនេះមានផ្តល់ជូនជាភាសារលោកអ្នកនៅឯការិយាល័យ DSHS ប្រចាំតំបន់របស់លោកអ្នក ។ (Cambodian)

本小冊備有您的語言版本，可向您當地的 DSHS 辦事處索取。(Chinese)

اين جزوه در زبان شما در اداره خدمات اجتماعي و درماني DSHS منطقه ايتان در دسترس مي باشد. (Farsi)

Dlaim ntawv nuav muaj txhais ua koj yaam lug hab nwg nyob rua ntawm lub DSHS kws ze koj ko. (Hmong)

이 팜플렛의 한국어 팜플렛은 귀하지역 관할 보건사회부(DSHS) 사무소에 비치돼 있습니다.(Korean)

ປື້ມຄູ່ມືຫົວນີ້ມີໄວ້ໃຫ້ໃນພາສາຂອງທ່ານຢູ່ທີ່ຫ້ອງການ DSHS ທ້ອງຖິ່ນຂອງທ່ານ. (Laotian)

ਇਹ ਪੈਂਫਲੇਟ ਤੁਹਾਨੂੰ ਮਿਲ ਸਕਦਾਂ ਹੈ ਆਪ ਦੀ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿਚ ਆਪਣੇ ਸਥਾਨੀ DSHS ਦਫਤਰ ॥ (Punjabi)

Acest pamflet este disponibil în limba dumneavoastră la oficiul DSHS local. (Romanian)

Вы можете получить эту брошюру на своём языке в своём местном офисе DSHS.(Russian)

O lo'o maua le tusi lea i lau gagana i le ofisa o le Welfare (DSHS). (Samoan)

Ovaj pamflet je dostupan i na vašem jeziku u vašem mjesnom DSHS uredu. (Serbo-Croatian)

Waraaqahani waxaad ka helikartaa xafiiska Walfeerka, DSHS, ee kuu dhow, iyaga oo ku qorran afgaaga. (Somali)

Ang pamphlet na ito ay nakasulat rin sa Tagalog at makukuha sa tanggapan ng DSHS na pinakamalapit sa inyo. (Tagalog)

እዚ መጽሔት እዚ ብቋንቋኹም ኣብ ከባቢኹም ዝርከብ ቤት ጽሕፈት ዌልፈር ይርከብ (Tigrigna)

Ви можете одержати цю брошуру на своїй мові в своєму місцевому офісі DSHS.(Ukrainian)

Tập sơ liệu này hiện có bằng ngôn ngữ của quí vị tại văn phòng DSHS địa phương.(Vietnamese)

USDA waa daryeel bixiye iyo loo-shaqeeye bixisa fursad loo siman yahay.


©2021 FIS. Dhammaan xuquuqaha waa ay dhowrsan yihiin.

Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

DSHS 22-310 SM (Rev. 09/21) Somali

# Isticmaalka Kaarka Washington Quest EBT




**DIGNIIN CIQAAB AMA GANAAX:**

**Waa sharci-darro in la iibiyo ama la isku-dayo in la iibiyo kaarka EBT, ama la dhaafsado ama la isku dayo in la dhaafsado dheefaha cuntada wax kastoo qiimo leh sida: kaash, daroogo, hub, ama wax kasta oo aan ahayn agab cunto oo u-qalma oo laga helo tafaariiqle idman. Isticmaalka khaldan ee ula-kaca ah waxaa ka dhalan kara in lagaa joojiyo, ganaaxyo, iyo tallaabo sharci, oo ay ku jirto in dacwad dembi lagugu soo oogo.**

Si aad u hesho macluumaadka koontada xisaabta, booqo

**www.ebtedge.com**

**Ama isticmaalka app-ka telefoonka gacanta ee *ebt*EDGE**

ama wac

## *Adeegga Macamiilka*

**888-328-9271**
**711 (TTY State Relay)**
**800-833-6385 (Telebraille)**